

Sharciga 1 Setembar `1970 lamba. 52.

Wax ka Baddalka Xeerka lamba. 10 Janaayo 1970 lamba. 3

**GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Xaashida kobaad Kacaabka;
Marka uu arkay Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1970;
Marka uu arkay Xeerka 10 Janaayo 1970, lamba. 3 iyo wax ka baddalka ka dambeyay;
Marka uu arkay oggolashaha Golaha Sare Kacaanka.

**WUXUU MEELMARINAYA XEERKAAN
Qod. 1**

Baragrafka 5 ee qodobka 2 ee Xeerka 10 Janaayo 1970 lamba. 3 waxa loo baddalay sidaan:

Qayb kasta ee ka mida Maxkamadda Badbaadada Gobolka waxay ka koobantahay Guddoomiyaha Guddiga Kacanka Gobolka oo guddoominaya iyo labada xubnoodo soo socota:

- 1) Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka ama garsoore Maxkamadda Gobolka;
- 2) Sarkaal ka tirsan ciidamada Qalabka Sida oo ay soo magacabaan Golaha Kacaanka Gobolka.

Maxkamadda Badbaadada Gobolka eedda waxaa soo jeedinaya sarkaalka haya xilka wakiilnimada Xeer Ilaaliyaha Guud Gobolka.

Qod. 2

Xeerkaan si deg-degga ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 1 Setembar 1970.

Guddoomiyaha
Golaha sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre